Soomaali

Ku Soo Dhawow Gaadiidka Metro!

Fadlan nafis oo ku istareex raacitaankaaga. Waxa aanu sida ugu wacan ugu dedaali doonaa inaanu si nabad ah oo raaxo leh kuu geyno meesha aad rabtid inaad tagtid.

Raacitaanka Baska

Ku Sug Hakadkaaga Baska

Lambarka jidkaaga ka eeg calaamadda hakadka baska. Jadwalada, maababka iyo warka kale ee gaadiidka waxa laga yaabaa in lagu soo dhejiyay hakadkaaga baska.

Garo Baskaaga

Marka basku soo dhawaado, hubi lambarka jidka iyo goobta aadista (oo lagu muujiyay korka daaqada hore) si aad u hubsatid inuu yahay baskaagii.

Raac Baska

Iyada oo ku xidhan jidka baska, goobta raacista iyo wakhtiga maalinta, waxa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad bixisid noolka ama lacagta raacista marka aad raacdid baska. Wakhtiyo kale waxa laga yaabaa inaad bixisid marka aad degaysid. Eeg calaamadda ku taala sanduuqa noolka marka aad raacaysid baska si aad u aragtid goorta la rabo inaad bixisid noolka ama lacagta raacista. Markay haboon tahay, muuji kaadhkaaga raacista (pass) ama godadka saxda ah ee sanduuqa noolka ku rid tigidho ama lacag sax ah oo ah lacagta Maraykanka. Raadso kursi oo ku istareex raacistaada.

Ka-degista Baska

Marka basku u soo dhawaado hakadkaaga ama meeshii aad kaga degi lahayd, jiid xadhiga ka sareeya daaqadaha si aad darawalka u ogeysiisid inuu joogsado.

Xeerarka Raacista

- Bixi noolka saxda ah
- Ixtiraam asturnaanta rakaabka kale
- Ha sababin dhibaatooyin xagga amaanka ah
- Isticmaal samaacadaha dhegaha
- Wax ha cunin, sigaar ha cabin ama qashin ha tuurin
- Lama ogala cabitaanada aalkolo ama khamri ah
- Ha dhibin darawalka ama rakaabka kale
- Ha ku jiifsan kuraasta
- Ixtiraam maalka hay'adda gaadiidka
- Gaadiid ahaan kaliya u isticmaal adeegyada iyo qalabka Metro

Warka Nooliga

Sida Loo Bixiyo

Lacag ama tigidho bas ku rid sanduuqa noolka. Darawaladu ma sitaan sarif. Fadlan sii diyaarso lacagta noolka oo sax ah. Haddii aad isticmaashid kaadhka baska (pass), dhex mari akhriyaha kaadhadhka ee ku yaala sanduuqa noolka ama tus darawalka baska.

Haddii aad u baahan tahay inaad beddelatid baska si aad u tagtid meesha aad rabtid, weydiiso darawalka inuu ku siiyo wareejin (transfer) marka aad lacagta bixinaysid. Iyada oo ku xidhan baska aad u beddelatid, wareejintaada Metro waxay u dhigmi doontaa nool buuxa ama nool badh ahaan ah oo aad ku raacdid baska kuugu xiga. Wareejintu waxay shaqeynaysaa ama sharci tahay mudo aan dhaafsanayn 90 daqiiqadood laga bilaabo markii la bixiyay.

Waxa la Bixiyo

Aagga adeegga ee Metro waxa uu leeyahay laba 'aag nooli.' Safarkaaga basku waxa u yahay safar ah 2 aag haddii aad ka gudubtid xadka Magaalada Seattle. Inta lagu jiro saacadaha ugu sixmadda badan – oo ah Isniin ilaa Jimce, 6–9 subaxnimo iyo 3–6 galabnimo, dadka waaweyni waxay bixiyaan in wax yar ka badan saacadaha aan ahayn kuwa sixmadda. Noolka ay bixiyaan raaceyaasha kale oo dhan waa isku mid maalintii oo dhan.

Noolka Metro	1 Aag	2 Aag
Qof Weyn (saacadaha sixmadda)	$1.75	$2.25
Qof Weyn (saacadaha ahayn sixmad)	1.50	1.50
Dhallin (da'da 5-17)	75 senti*	75 senti*
Caruur (ka yar 5)	bilaash	bilaash
Kaadhka Maalinta oo Dhan	3.50	3.50

(Kaadhadhka Maalinta oo Dhan waxa laga helaa darawalada baska waxana kaliya oo ay shaqeynayaan Sabtida, Axadda iyo maalmaha ciidaha.)

*Laga bilaabo 1-da Bisha Todobaad 2008

Aagga Bilaash ku Raac

Bilaash ku raac badhtamaha Seattle laga bilaabo 6-da subaxnimo – 7 fiidnimo maalin kasta. Aagga Bilaash ku Raac waxa uu ku aadan yahay marka waqooyi laga soo bilaabo Battery Street, koonfurna ilaa South Jackson Street, marka bariga laga bilaabona waa jidka 6th Avenue, galbeedna ilaa biyaha hortooda. Khadka Tareenka Biyaha Hortooda (Waterfront Streetcar) wakhti kasta waa bilaash.

Warka Adeegga

Adeegga Baska ee Leh Wiish

Dhamaan basaska Metro waxay leeyihiin wiishash ama salax fuulitaan (ramp) lagu isticmaalo kara badi hakadyada baska. Wiishashku waxa gargaari karaan rakaabka isticmaala kursiga curyaanka ama qalabka lagu socdo, ama raaceyaasha kale ee isticmaalka jaranjaradu dhib ku tahay, si ay u raacaan oo uga degaan baska.

Kaadhadhka Raacista iyo Xidhmooyinka Tigidhada

Kaadhadhka Raacista iyo xidhmooyinka tigidhada waxa lagu iibiyaa goobo ka badan 150 oo ku baahsan Seattle iyo King County. Wac 206-624-PASS (7277) si aad u ogaatid qiimaha iyo goobaha iibka.

Jadwalyada

Jadwalyada waxa ku yaala jidadka baska, wakhtiyada, nooliga, maabab iyo war kale oo muhiim ah. Jadwalyada waxa laga heli karaa basaska iyo laybareeriyada, goobo iib oo la doortay, dhismeyaasha xafiisyada ah qaarkood iyo xafiiska Adeegga Macaamiisha ee Metro. Wac 206-553-3060 si aad u ogaatid goob kuu dhow.

Xafiisyada Adeegga Macaamiisha ee Metro

Xarunta King Street 201 S. Jackson St. Isniin–Jimce 8 subaxnimo–5 galabnimo	Transportation Connection Rainier Square 4th Ave. & University St. Isniin–Jimce 9 subaxnimo–5:30 galabnimo

Downtown Seattle Transit Tunnel*
Westlake Station, Mezzanine Level
Furan maalmaha shaqada inta lagu jiro saacadaha shaqada

*Kaadhadhka baska iyo xidhmooyinka tigidhada lagama heli karo Westlake Tunnel Station, laakiin waxa aad halkaa ka heli kartaa jadwalyada iyo gargaar ah xagga qorsheynta safarka.

Baasgeel & Raacid

Dhamaan basaska Metro waxay leeyihiin raar la saarto baasgeelka/bushkuleetiga. Baasgeelada waxa lagu qaadi karaa baska iyada oo adeego yahay sida loo soo kala horeeyo. Lagaa qaadi maayo nooli dheeraad ah.

Metro ma ogala in gudaha basaska la saarto baasgeelka sababo amaan daraadood. Baasgeelada waxa lagu raran karaa ama lagala degi karaa hakad bas kasta wakhti kasta marka laga reebo Aagga Raacista Bilaashka ah ee badhtamaha Seattle laga bilaabo 6 subaxnimo ilaa 7 fiidnimo. Inta lagu jiro wakhtigaa, waa inaad ku raratid ama ku dejisid baasgeelkaaga hakadka ugu horeeya jidkaaga ama ugu dambeeya gudaha Aagga Raacista Bilaashka ah, ama hakadyada godka ee Convention Place ama rugaha International District/Chinatown.

Sida Safarkaaga Loola Wadaago Dadka Kale

Metro waxay kaa gargaari kartaa sihaminta siyaabo kale oo aad ku tagi kartid shaqada ama dugsiga marka basku aanuu kugu habooneyn. Safarka la wadaag dadka kale oo wata baabuur yar ama faan. La xidhiidh 206-625-4500 ama TTY Relay 1-800-833-6388 ama RideshareOnline.com si aad u heshid war dheeraad ah.

Gargaar Teleefonka ah iyo War Gaadiid oo Kale

Gargaar Teleefonka ah

Warka Raaceyaasha	206-553-3000
Isticmaaleyaasha TTY	206-684-1739
Adeegga Macaamiisha	206-553-3060
Isticmaaleyaasha TTY	206-684-2029
Wakhtiga Baska (war jadwal oo toos ah)	206-287-8463
Iibka Kaadhadhka Baska/Xidhmooyinka Tigidhada	206-624-PASS (7277)
Alaabta Luntay iyo Kuwa Helay	206-553-3090

Sound Transit
Wicis Bilaash ah 1-888-889-6368
Isticmaaleyaasha TTY 206-398-5086
www.soundtransit.org

Community Transit 425-353-RIDE (7433)
Wicis Bilaash ah 1-800-562-1375
Isticmaaleyaasha TTY 425-778-2188
www.commtrans.org

Pierce Transit 253-581-8000
Wicis Bilaash ah 1-800-562-8109
Isticmaaleyaasha TTY 253-582-7951
www.piercetransit.org

Everett Transit 425-353-7433
Isticmaaleyaasha TTY 425-778-2188
www.ci.everett.wa.us/transit

Metro Online

Metro Online waa rugta internetka ee Metro oo loogu talogalay helista war buuxa oo ku saabsan adeegyada Metro, oo uu ku jiro jidadka, jadwalyada, maababka, barnaamijyo iyo adeegyo. Cinwaanka rugta internetku waa www.kingcounty.gov/metro.

Qorsheeyaha Safarka Heer Goboleed oo Internetka ah

www.kingcounty.gov/tripplanner

Waad ku mahadsan tahay raacista Metro!

Electronic fareboxes accept paper or coin money for fare as well as tickets and passes.

전자 요금기에는 티켓, 패스, 지폐 혹은 동전을 사용할 수 있습니다.

Hộp thu tiền bằng điện tử nhận tiền giấy hoặc tiền cắc khi quý vị trả lộ phí cũng như khi dùng vé thường và thẻ đi xe bus.

ប្រអប់ឆេរឡិចត្រូនិចទទួលយកក្រដាសប្រាក់ឬកាក់សំរាប់តំលៃឈ្នួល ក៏ដូចជាសំបុត្រនឹងប័ណ្ណដែរ ។

除了接受車票或月票以外，還備有電子收費機，可收取以紙幣或硬幣支付的車費。

Cajas electrónicas de tarifa aceptan dinero de papel o moneda para la tarifa además de boletas y pases.

Электронные автоматы для оплаты за проезд принимают банкноты и монеты, а также билеты и проездные.

ຫີບເກັບປີ້ແບບອິເລກໂຕຣນິກຮັບເອົາເງິນເຈ້ຍ ຫຼືເງິນຫຼຽນ ສໍາຫຼັບການເດີນທາງແບບດຽວກັບການໃຊ້ນີ້ ແລະຂີ້ຄ້ານບາສ.

Як плату за проїзд електронні автомати для збору плати за проїзд приймають банкноти та монети, а також квитки та проїзні квитки.

Sanduuqyada noolka ee elegtaroonigga ahi waxay aqbalayaan lacagta warqadda ah ama macdanta ah si nooliga loo bixiyo iyo waliba tigidhada iyo kaadhadhka.

ናይ ኤሌክትሮኒክ ናይ ክፍሊት ሳጹናት ናይ ወረቐት ገንዘብ ወይ ሳንቲማት፣ ከምኡውን ቲኬታትን ፓሳትን ይቅበል እዩ።

All Metro buses are wheelchair accessible.

모든 메트로 버스에는 휠체어 출입이 가능합니다.

Tất cả các xe bus Metro đều có chỗ cho xe lăn lên xuống.

ត្រប់ប៊ីសមេត្រូទាំងអស់មានច្រកចេញចូលសំរាប់កៅអីកង់ ។

Metro運輸公司的所有公車都有方便輪椅上下車的裝置。

Todos los autobuses Metro son accesibles a sillas de rueda.

Все автобусы Metro приспособлены для проезда лиц в инвалидных колясках.

ຣົຖບາສເມໂທຣທັງໝົດມີທາງໃຫ້ລໍ້ນັ່ງຄົນພິການຂຶ້ນໄດ້.

Всі автобуси Metro обладнані підйомниками для інвалідних візків.

Dhamaan basaska Metro waxa raaci kara dadka isticmaala kursiga curyaanka.

ኩሎም ናይ ሜትሮ ኣውቶቡሳት ናይ ኣካለ ስንኩላን ብሽክሌታታት ዘእትዉ እዮም።

All Metro buses can transport bicycles.

모든 메트로 버스에는 자전거 운반이 가능합니다.

Tất cả các xe bus Metro đều có thể chở xe đạp.

ត្រប់ប៊ីសមេត្រូទាំងអស់អាចដាក់កង់បាន ។

Metro運輸公司的所有公車都可載運腳踏車。

Todos los autobuses Metro pueden transportar bicicletas.

Все автобусы Metro приспособлены для перевозки велосипедов.

ຣົຖບາສເມໂທຣທັງໝົດສາມາດບັນທຸກຣົຖຖີບ.

Всі автобуси Metro можуть перевозити велосипеди.

Dhamaan basaska Metro waxay qaadi karaan baasgeelada/bushkuleetiyada.

ኩሎን ናይ ሜትሮ ኣውቶቡሳት ብሽክሌታ የጎዓዕዛ እየን።